

Warbixin iyo fursadda iska-tallaalida fayruuska [HPV]

Ka-tallaalida fayruuska [humant papillomvirus (HPV)] ee gabdhaha wuxuu ka hirgalay Barnaamijkda tallaalka ilmaha ee dalka Iswiidan 2010. Laga bilaabo bisha agoosto 2020 waxaa fayruuska [HPV] laga tallaali doonaa dhammaan ardayda dhigata, sannad-dugsiyeedka 5-aad. Fayruuska [HPV] wuxuu wax ka beddela unugyada, wuxuuna goor dambe sababa kaansarka ku dhaca dhuunta ilmogalenka, cunaha, xubnaha tarmada iyo duleelka futada.

Sidii hab aan qabyo ahayn fayruuska looga badbaado awgeed, waxaa qofka laga tallaala laba jeer kuwaasoo ugu yaraan 6 bilood u dhaxeeyaa. Haddiise markii ugu horeeysay ee qofka fayruuska laga tallaalay ay da'diisa ahayd 15 sano, waa in saddex jeer fayruuska laga tallaala.

Adigoo foomkaan adeegsanayo ayaa na wargelin kartaa, haddii aad raali ka tahay in ubadkaaga fayruuska laga tallaalo iyo in kale, waxaad calaamad saarta afargeesyada hoos kaaga muuqda. Haddii aan wax oggolaansho ka helin, ilmahaaga fayruuska lagama tallaali doono. Oggolaanshada waxay khuseeysa saddexda jeer ee tallaalida. Iska-tallaalida kahor waxaan ka codsanaynaa inaad ka jawwabto su'aalaha ku qoran caddaymaha caafimaadka ee halkaan hoos. Haddii tallaalka koowaad ama labaad kaddib wax dhacaan waa inaad na wargelisaan. Haddii aad u baahan tiihiin warbixin dheeraad ama su'aallo aad na waydiin lahaydeen, la xiriir kalkalisada caafimaadka ee dugsiga.

Iska-tallaalida [HPV]

Waa in dib loogu soo celiyaa kalkalisada caafimaadka ee dugsiga kahor markii taariikhda ay ku beegan tahay

Magaca ilmaha

Tobbanka lambar aqoonsiga/fasalka

- | |
|---|
| <input type="checkbox"/> Jaa, waxaan raali ka ahay in ubadkayga fayruuska laga tallaalo

<input type="checkbox"/> Maya, raali kama ihi in ubadkayga fayruuska laga tallaalo |
|---|

Caddaymaha xaadal-caafimaadeedka (*uma baahid inaad ka jawaabto haddii aadan raali ahayn in ubadkaaga fayruuska laga tallaalo*)

Ilmahaaga

- | | |
|--|--|
| – ma qaba caaro/aleerjiyada halis ah? | Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> |
| – kaddib markii berri hore la tallaalay hab halis ah ma ugu xannuunsaday? | Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> |
| – ma qaba cudur raage ah oo halis ah? | Haa <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> |

Haddii jawaabta ay Haa tahay, fadlan warbixin dhamaystirid ah ku qor dusha warqadaan.

Saxiixyada Degmada: Taariikhda:

Saxiixa, magaca oo saddexan iyo lambarka taleefanka (maalinimada) ee xilhaayeha xannaanadda/waalidka

Saxiixa, magaca oo saddexan iyo lambarka taleefanka (maalinimada) ee xilhaayeha xannaanadda/waalidka

Waa in labada xilhaayeha xannaanadda/waalidka ay hoosta ka saxiixaan, waa haddii xannaanadda ay wadaagaan.

Sida hadba ku xusan sharciga diiwangelinta barnaamijka tallaalida qarneed (2012:453), waa in dhammaan tallaalida ilmaha laga diiwangeliya diiwanka barnaamijka tallaalida qarneed. Warbixin dheeraad oo ku saabsan diiwanka tallaalka ka aqriso barta internetka www.folkhalsomyndigheten.se

Warbixin dhamaystirid ah:
